

# Hagaha Agabyada LGBTQIA+

Ururada Maxalliga ah, kuwa gobolka iyo qaranka ee taageera khaniisyada dumarka, kuwa raga ah, dadka lab iyo dhedig labada ugalmooda, is jinsi rogayaasha, iyo bulshada labada is jinsi rogayaasha ah.

## AGABYADA MAXALLIGA AH

### Mu'asasaadka Daryeelka Caafimaadka AIDS-ka [www.aidshealth.org](http://www.aidshealth.org)

614-223-1532

Waxay bixisaa baaritaanada Aydhiska, oo waxay daryeel caafimaad oo dhammaystiran siisaa dadka la nool cudurka Aydhiska, iyadoo umaraysa xarunteeda daryeelka caafimaadka ee Columbus iyo farmashigooda.

### Black, Out & Proud

[www.blackoutandproud.com/](http://www.blackoutandproud.com/)

Waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo bixisa goob loogu talagaley in lagu caawiyoo khaniisyada madowga ah iyo shakhsiyaadka udooda, waxbara iyo kuwa taageera.

### Black Queer & Intersectional Collective

[bqic.net/](http://bqic.net/)

Ururka asaaska bulshada ee Bartamaha Ohio, kaas oo ushaqeeyaa xoriyada khaniisyada ama dadka isjinsi rogay ee madowga ah ee LGBTQIA+ iyo dadka ka kala yimid dhammaan qaybahaa kala duwan ee nolosha iyadoo loo samaynayo waxqabadyo toos ah, loona marayo ururada bulshada, waxbarashada, loona abuurayo goobo amni ah.

### Buckeye Region Anti-Violence Organization

[www.bravo-ohio.org](http://www.bravo-ohio.org)

1-866-86-BRAVO (27286)

Waxay bixisaa barnaamijyo bulsho iyo kuwo shakhsiyeed oo dhammaystiran oo loogu olooleeyo, lagu taageero khaniisyada ka badbaadey nacaybka, rabshadaha, takoorka, rabshadaha lamaanaha, dabagalka iyo/ama weerarka galmaada.

### Xarunta Dhexe ee Gaarsinta Fayoqabka

[www.centraloutreach.com/](http://www.centraloutreach.com/)

614-360-2900

Waa urur caafimaad oo kor uqaadaya fayaqabka isagoo kobcinaya dhamaan nolosha bukaanka, wuxuu sidoo kale diirada saarayaa daryeel waafaqaya dhaqanka bukaanka, iyagoo ku dadaalaya inay fahmaan baahida macmiilka iyo sida si wanaagsan loola dhaqmo oo loo daaweyo.

### Hindisaha Caafimaadka ee Columbus Public Health - LGBTQ

[www.columbus.gov/LGBTQHealth](http://www.columbus.gov/LGBTQHealth)

614-645-1847

Waxay la howlagalayaasha bulshada ku xirtaa Isbahaysiga Caafimaadka Khaniisyada/LGBTQ ee Columbus-ta wayn, waxay tababarada khaniisyada/LGBTQ siisaa daryeel bixiyayaasha caafimaadka iyo adeeg bixiyayaasha kale, oo waxay wax ka qabataa kala duwanaanshaha caafimaadka ee barnaamijyada loogu talagaley bulshada LGBTQ.

### Equitas Health

[www.equitashealth.org](http://www.equitashealth.org)

614-299-2437

Waa urur daryeel caafimaad oo aan faa'iido doon ahayn oo ku yaala Columbus, kaas oo si gaar ah ula shaqeeyaa bulshada LGBTQ iyo shakhsiyadka la nool cudua HIV/AIDS.

### Shabakada Waxbarashada ee Khaniiska raga, dumarka iyo dadka aan khaniiska ahayn (Gay, Lesbian, and Straight Education Network)

[www.glsen.org/chapters/columbus](http://www.glsen.org/chapters/columbus)

Waxay ka shaqaysaa inay xaqiijiso in dugsigu amaan u yahay DHAMAAN ardayda, iyada oo aan loo egayn nooca galmaada ee ay ka helaan iyo sida ay jinsiyadooda isugu aqoonsanyihiin.

### Xarunta Dhalinyada ee Kaleidoscope

[www.aidshealth.org](http://www.aidshealth.org)

614-294-5437

Waxay si wada jir ah ula shaqaysaa dhallinyarada da'doodu udhaxayso 12-20 ee ku dhaqan bartamaha Ohio, si ay u abuurto bay'ad amni ah oo awood siinaysa dhallinyarada LGBTQ iyada oo loo marayo obole, waxbarasho iyo taageero.

### Waalidiinta, Qoysaska iyo Asxaabta Khaniisyada Dumarka iyo Raga

[www.columbuspflag.org](http://www.columbuspflag.org)

Waxay hormarisaan sinnaanta iyadoo loo marayo taageero, waxbarasho iyo obole. Wakhtiyada shirarku waxay ku qoran yihiin webseedka.



COLUMBUS  
PUBLIC HEALTH

## Columbus Public Health • Hagaha Agabyada LGBTQIA+

### Queer Behavior

[www.facebook.com/QueerBehavior](http://www.facebook.com/QueerBehavior)

Waxay midaysaa bulshada khaniisiinta ee Columbus iyadoo loo abuurayo barnaamijyo iyo munaasabadooyin bulsho oo madadaalo iyo xiiso leh.

### Stonewall

[www.stonewallcolumbus.org](http://www.stonewallcolumbus.org)

614-299-7764

Xarunta Bulshada LGBT ee Bartamaha Ohio, xaruntaas oo leh kooxaha isdhexgalka, kuwa daawaynta iyo taageerada, latalinta, baaritaanada HIV/Cudurada galmada laga qaado, iyo bandhiga sanadlahaa ah ee Columbus Pride Parade.

## AGABYADA GOBOLKA IYO KUWA QARANKA

### Mashruuca ay Ururka Xoriyada Madaniga

### Maraykanka ay ugu talagaleen LGBT

[www.aclu.org/issues/LGBT-rights](http://www.aclu.org/issues/LGBT-rights)

Waxay ilaalisaa xuquuqda shakhsiyadka LGBT iyadoo u maraya obole sharchiyeed, oo ay ka midyihiin ilaalinta xuquuqda dhallinyarada LGBTQ ee iskuulada dhigata, udoodista sharchiyeed la degaalanka takoorka, hormarinta in LGBTQ ay helaan daryeelka caafimaadka, iyo ilaalinta xuquuqda waalidiinta iyo qoysaska LGBTQ.

### Black Transmen of Ohio

[www.btmohio.org/](http://www.btmohio.org/)

Waxay kordhisaa muuqaalka iyo sinaanta shakhsiyadka madowga ah ee raga isu dhallan rogay iyadoo loo marayo dhisida bulshada, la talinta iyo helida agabyada ee Ohio.

### Xarunta Sinaanta ee Madowga

[www.centerforblackequity.org](http://www.centerforblackequity.org)

Waxay kor uqaadaa shabakada LGBT ee caalamiga ah si loo hormariyo fursadaha caafimaadka iyo fayoqabka, kobcinta dhaqaalaha iyo xuquuqda sinaanta ee barnaamijyada loogu talagaleey dadka LGBT ee aan cadaanka ahayn iyo asxaabtooda.

### Equality Ohio

[www.equalityohio.org](http://www.equalityohio.org)

614-224-0400

Ururada aan xisbiyada ka tirsanayn, ururada samafalka ee u olooleya sharci dejinta sinaanta buuxda ee bulshada LGBTQ ee Ohio.

### Ololaha Xuquuqda Aadanaha

[www.hrc.org](http://www.hrc.org)

Waxay udoodaa LGBT Maraykanka ah, waxay wacyigelisaa facilada asaasiga ah ee bulshooyinka kala duwan, waxay si xeeladaysan umaalgallisaa doorashada shakhsiyadka sinnaanta aaminsan, oo waxay dadwaynaha bartaa arimaha LGBT.

### Xarunta Qaranka ee Sinaanta Jinsi roga

[www.transequality.org](http://www.transequality.org)

Ururka cadaalada bulshada ee aan faa'iido doonka ahayn, si uu uhormariyo tayada dadka is jinsi rogay, iyada oo loo marayo obole, iskhaashi iyo xoojin.

### TransOhio

[www.transohio.org](http://www.transohio.org)

614-441-8167

Waxay u adeegtaa is jinsi rogayaasha Ohio iyo dhamaan bulshooyinka la shaqeeya iyadoo la siinayo adeegyo, waxbarasho, taageero iyo udoodis, oo la hormarinayo caafimaadka, bedqabka iyo khibradaha nolosha shakhsiyadka iyo bulshooyinka isjinsi rogayaasha Ohio.

### Mashruuca Trevor (Trevor Project)

[www.thetrevorproject.org](http://www.thetrevorproject.org)

1-866-4-U-TREVOR (8-87386)

Codka ugu horreeya ee dalka ee ka hortagga is-dilka dhalinyarada LGBTQ, oo bixinaya ka hortagga dhibaatooyinka oo bilaash ah 24-saacba, ka hortagga rabshadaha dhalinyarada LGBTQ iyo barnaamijyada waxbarasho ee dhalinyarada iyo barayaasha cagajuglaynta iyo ka hortagga dhibaatooyinka.